# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

***Golihii 5$^{aad}$ ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12$^{aad}$ fadhigii 7$^{aad}$***

***Wakhtiga uu Furma:-*** *9:34 AM*
***Taariikhda: - Sabti 09 August 2025***

**Gudoonka: -** Mudane, Siciid Mire Faarax (Giire).

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib

**Ajandaha Fadhiga: - Doodda** Xeerka Kala-xadaynta Nidaamka Xukuumada

**Gudoonka:-** Marka hore ASC, Mudanayaal, maanta oo bishu tahay 09 August waxaynu furan doona fadhigii 7aad ee kal-fadhiga 12aad, waxa fadhiga 42 Mudane, waxaana ku bilaaban doona Ayaadaha Quraanka oo Sh. Axmad Dayib innoo akhriyo.

**Md. Sh. Axmad Dayib:-** Quraanka Furitaanka Fadhiga.

**Gudoomiyaha:-** Sh. Axmad Dayib Ilaahay ha ka abaalmariyo Ayaadaha Quraanka, Mudanayaal, sida ku cad Ajandaha aynu soo gashanay xalay, saaka waxa inoo yaala doodda wax ka badelka Xeerka Kala-xadaynta Xukuumada, waxaynu bilaabaynaa doodda, waxaana hadalka siiyay Xildhibaan Maxamed Xasan Siciid.

**Md. Maxamed Xasan Siciid** *(05Min, 29sec):-* Bismillahi Raxmaani Raxiim; Mudane Guddoomiye iyo mudanayaasha sharafta leh, muhiimada xeerkan iyo sababta uu u baahan yahay in degdeg loo ansixiyo ayaa ah in uu ka shaqeynayo hagaajinta qaabdhismeedka iyo awood qaybsiga xukuumadda iyo hay'adaha madaxa banaan. Iyada oo aynu ognahay in xeerkani muddo badan golaha horyaalay, sidoo kalena ay tahay in xeerkan aan aaminsanahay inuusan maanta ina dhaafin, macno doodiisu dib u dhacuna uu keenayo jahawareer maamulka, is-dulfuul shaqooyin, dib u dhac ku yimaada adeeg bixinta iyo hir-galinta mashaariicda horumarineed. Waxaa kale oo jira dhibaato sharci oo ku saabsan qodobada sharci ee aan weli dhaqan-galin.

Taageerada dastuurka ee xeerkan: Qodobka 90aad, Madaxweynaha JSL ayaa leh awoodda qaybinta iyo kala xadaynta wasaaradaha iyo hay'adaha, laakiin awoodaasi waxay u baahan tahay hagitaan sharciyeed oo ay tahay in golaha wakiiladu ansixiyo, taas oo ah ta aynu maanta u fadhino.

Qodobka 110aad iyo Qodobka 112aad oo ku saabsan maamul-daadijinta dawladaha hoose, xeerkani wuxuu qaybeynayaa awoodaha la xidhiidha ee ka dhaxeeya wasaaradaha iyo dawladaha hoose si loo waafajiyo dastuurka. Sidoo kale, xeerkan 71 wax ka badalkiisa waxa ay u baahan tahay in ay noqoto qaar wax tar leh. Qodobada cusub ee muhiimka u ah in xeerkan la dul istaago, waxa maanta halkan aan taaganahay anigoo ka hadlay qodobada ay tahay in ahmiyada koowaad la siiyo.

Waxaa jira mudanayaal, hay'adda dhawrista tayada waxa ay ku aasaasantahay xeer baarlamaan. Waxaan aaminsanahay halkaasna xeerkani qodobo badan ka taabtay in hay'addaasi loo raaco qodobadaas dhaqan-galka ah ee baarlamaan-ku ansixiyay, isla markaasina wasaaradda ganacsiga iyo dalxiisku ay noqoto line ministry, balse loo raaco gudashada waajibaadka tayada. In xeerkasi uu maamulo isla markaasna loo raaco. In hay'adda dhawrista tayada si cad loo hoos geeyo xeerkasi isla markaana wasaaradda ganacsigu ay noqoto line ministry.

Mudane Guddoomiye, Madxafka Qaranka waa kaydka taariikhda iyo hidaha Somaliland. Inta badan dalalka dunida, madxafyada qaranku waxay ka qayb-qaataan horumarinta dalxiiska, dhaqaalaha, dhaqanka iyo dhiirrigelinta wacyiga bulshada. Soo-jeedintayda qodobkaasina waxay tahay in madxafka qaranka si sharci ah loo hoos geeyo wasaaradda ganacsiga iyo dalxiiska si loo helo horumar iyo maamul isku xidhan oo ka faa'iideeya dalxiiska iyo dhaqanka qarankan uu leeyahay.

Mudanayaal, waxa qodobkayga saddexaad uu yahay sanduuqa qaranka ee dhalinyarada. Sida ku cad dastuurka, Qodobka 54aad, marka la sameeyo sanduuqyo waa in la soo raaciyo xeerarkii lagu maamuli lahaa sanduuqyadaas. Mudane Guddoomiye, dhalinyaradu waa hantida ugu weyn ee qarankani haysto. Sanduuqa qaranka ee dhalinyaradu waa aalad lagu hormarin karo shaqo abuurka, xirfadaha iyo hal-abuurka dhalinyarada.

Haddii sanduuqaasi ku hoos jiro wasaarad kaliya, waxa iman karta inuu noqdo mid siyaasadaysan oo kalsoonidii dadkii lacagta ku shubi lahaa ay meesha ka baxdo. Sanduuqan kaliya waa inuu noqdaa mid xukuumaddu kaliya ay ku shubto lacag, balse uu noqdo mid xukuumaddu lacag ku shubto isla markaasina ganacsatada, deeq-bixiyayaasha iyo cid kasta oo daneeya ahi ay lacag ku shubto.

Soo-jeedintaydu waxay tahay in sanduuqa dhalinyarada qaranka loo sameeyo maamul madax-bannaan oo leh gole maamul oo ka kooban wasaaradda dhalinyarada iyo ciyaaraha iyo wasaaradaha kale ee ay khuseyso, wakiilo dhalinyaro, bulshada rayidka ah iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay.

Mudane Guddoomiye, anigoo ka duulaya dastuurka Qodobka 109aad, dastuurka Somaliland wuxuu si cad u qeexayaa maamulka gobollada iyo degmooyinka oo hoos yimaada nidaamka guud ee maamulka gudaha dalka. Sidaa darteed waa in masuuliyadda gobollada, degmooyinka dalka ay si rasmi ah ugu hoos jirtaa wasaaradda arrimaha gudaha. Dhanka kale, waxa halkan xeerkan lagu cadeeyay oo lagu soo qaybiyay in loo kala saaray wasaaradii arrimaha gudaha laba wasaaradood. Waxaan soo jeedinayaa in lagu noqdo dastuurka oo loo eego awood qaybsiga labadaa wasaaradood sida uu dhigayo dastuurku, Qodobka 110aad iyo Qodobka 109aad oo ka hadlaya maamulka gobollada iyo degmooyinka.

Mudanayaal, afarta qodob ee aan soo jeediyay waa kuwo waafaqsan dastuurka iyo danaha qaranka JSL. Ugu dambeyntii, qodobka aan ku soo gunaanadi lahaa waxa weeye wasaaradda xidhiidhka golayaasha iyo dastuurka. Waxaan soo jeedinayaa in iyana lagu daro demarcation-ka. Waxa aad ka war haysaan inaanay dimuqraadiyadu ahayn doorashooyinka oo kaliya, ee ay tahay waxa dhacaa doorashooyin dhexdood. Sidaa awgeed taana waxaan soo jeedin lahaa in lagu daro demarcation-ka iyo in lagu daro hay'ad kor-meerta. Doodaydu waxay ku salaysan tahay in maanta xeerkaasi doodiisu naga dhamaato lana dadajiyo maadaama oo aynu ognahay in shaqooyin badan oo qarankani leeyahay u xaniban yihiin xeerkan. Waa mahadsantihiin.

**Md. Xuseen Aadan Cabdi** *(01min, 04sec):-* Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim; Mudane guddoomiye iyo mudanayaasha baarlamaanka, marka hore waa idin salaamayaa iyo saxaafadda iyo shaqaale weynaha. Asalaamu calaykum wa raxmatu Laah. Waxaan filayaa xeerkaa maanta ay doodiisu taallo inuu yahay xeer muhiim ah in badan na golaha hor yaallay, hawlo badan oo jiraana ay baahan yihiin in dhinacyo badan laga eego. Mudane guddoomiye, waxaan soo jeedinayaa oo aan soo jeedintiisa ku waafaqsanahay afartii qodob ee uu ka hadlay xildhibaankii iga horreeyay ee xildhibaan Maxamed Xasan. Afartaa qodob runtii *seconded* baan leeyahay, waa ku raacsanahay xeerkaas sidaa uu xildhibaanku u sheegay inaynu afartaas qodob ka eegno kuna raacno sababo badan oo jira awgood, sidii ay xukuumaddu inoo soo gudbisay xeerkaas horena aynu isu dhaafino oo aynu u ansixino. Waxaanan ku raacsanahay afartaas qodob, guddoomiye, aad iyo aadna waad u mahadsan tihiin.

**Md. Cumar Jaamac Faarax** *(01min, 29sec):-* Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim; Guddoomiyaha baarlamaanka iyo guddoomiye ku xigeenka, xubnaha golaha baarlamaanka waa salaamantihiin.

Mudane guddoomiye, xeerkani muddo badan buu golaha hor yaallay, dawladuna baahi weyn bay u qabtaa in xeerkan lagu shaqeeyo. Garyaqaanka dawladda ayaa soo tafatiray

u soo gudbiyay golaha xukuumadda, golaha xukuumadduna iyagaa yaqaan maamulkooda, way soo ansixiyeen, golahana way u soo gudbiyeen, guddigeenna u xilsaarnaana way arkeen.

Waxaan qabaa in xeerkaasi aanu maanta inala dhaafin, ee dooddeena kadib inaynu maanta u codayno ansixintiisa. Waxa kale oo aan ku raacay *seconded*, garanaynayaa afartii qodob ee uu soo jeediyay Md. Maxamed Xasan Siciid, ayaan leeyahay *seconded*; xeerkaas inaanu waqti badan inagu qaadan, inay xukuumaddu baahi weyn u qabto in la ansixiyo, inay iyagu soo ansixiyeen, inay dawladuna meel uga soo wada jeedo ayaan filayaa. Markaa xeerkan waa inagu raftay, marka guddoomiye maanta inaynu codka galinno marka laga doodo ayaan kuu soo jeedinayaa, waxaanan *seconded* garaynayaa afartii qodob ee Maxamed Xasan soo jeediyay. Wasalaamu calaykum.

**Md. Barkhad Jaamac Xirsi** *(01min, 40sec)*:**-** Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim; Alxamdulillaahi Rabbi Caalamiin, wa salaahu calayhi wasalam, amaa bacdu; mudane guddoomiye, mudanayaasha golaha, runtii xildhibaan Maxamed Xasan, xildhibaan Xuseen, iyo xildhibaan Cumar oo iga horreeyay, iyo xildhibaan Cabdikariin, afarta xildhibaanba soo jeedintan qabay uun bay qabaan. Anigu waxaan isleeyahay dood badan oo aynu xeerka ku dul istaagno oo waqti qaadataa iima muuqato, sababtuna waxa weeyaan silig lugaha kaga maran buu xeerkani noqday hanaankii hay'adaha xukuumiga ahi ay ugu shaqayn lahaayeen guud ahaan qaranka.

Markaa waxaan soo jeedinayaa, maadaama oo xeerkii kala xadaynta hay'adaha xukuumadda uu yahay; hay'adaha xukuumadduna adeegyo badan oo amnigii, caafimaadkii, waxbarashadii iyo ictiraafkii iyo waxaas oo dhan ay u qabanayaan shacab qarankii Jamhuuriyadda Somaliland, xildhibaanada anoo ixtiraam u haya, doodu yaanay inagu dheerane afarta qodob ee *concern*-ka laga qabo ee *correction*-ka ama sixidda iyo is waafajinta, sida wax ku qabsoomayaan ee ay ku hirgalayaan kala xadayntaasi, aynu culayska u saarno.

Muddo maadaama uu inoo yaallay, xukuumaduna u dabrantahay hay'adahaheedii inay adeegyo waafiya toddobadaa bilood fuliso, xeerkaa ay soo gudbisay, inaynu waajibadkeena maanta ka gudno, hore u ansixino, sii deyno, taas uun baan aniguna *seconded* garaynayaa. Aad iyo aad baad mudane guddoomiye u mahadsan tahay, wasalaamu calaykum.

**Md. Cabdikariin Meecaad Isaaq** *(03min, 44sec)*:**-** Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim; Asalaamu calaykum guddoomiyaha Golaha Wakiillada, ku-simaha guddoomiyaha, xildhibaanada Golaha Wakiillada dhammaan aad baan u salaamayaa. Halakan waxaynu kaga doodaynaa xeerka kala xadaynta hay'adaha dawladda. Maaha inaynu isku

dulbaabino hay'adaha dawladda oo qaarna isku dulbaabaan, qaarna naajaxaan. Inagu waxaynu baahan nahay inay u kala samayno nidaamkii xeerarkii lagu kala aas-aasay in ay mid walba ku shaqayso. Tusaale ahaan, marka aynu soo qaadanno xeerkii Hay'adda Dhawrista Tayada, Xeer Lr. 18/2014, oo haddana aynu la soo qaadanno Xeerka Nidaamka Xukuumadda, Xeer Lr. 71/2024, Qodobkiisa 32-aad faqraddiisa 16-aad oo odhanaysa awoodaha iyo shaqada Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer Miyiga waxa ka mid ah ilaalinta tayada dawooyinka xoolaha iyo caafimaadka xoolaha.

Marka aynu la akhrino aas-aaska Hay'adda Tayada, wuxuu odhanayaa: awoodaha iyo shaqada guddida Hay'adda Dhawrista Tayada waa tayaynta iyo kor u qaadidda heerka caafimaadka, wax-soosaarka dalka iyo alaabooyinka soo dega, xoolaha iyo beeraha, si loo ilaaliyo caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaan dadka reer Somaliland; baadhista dhammaan dharka, agabka, manfacaha iyo wixii alaale wixii dibadda laga keeno ama dalka gudihiisa lagu sameeyo.

Halkaasina waa Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo hay'adda halka ay iska soo galayaan ee ay isku haystaan ee u baahan in si wanaagsan loo eego. Haddaad u soo gudubno Wasaaradda Ganacsiga, Qodobka 37-aad faqraddiisa 13-aad oo odhanaysa awoodaha iyo shaqada Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska inay ilaaliso, hubiso tayada adeegga ganacsiga dalka soo galaya iyo kuwa imanaya. Hay'adda Tayada qodobkeeduna wuxuu odhanayaa isaguna taa mid la mid ah. Waa waxyaabaha la mid ah ee in la kala xadeeyo, ee aan la isku sii daawan hay'adaha dawladda ee isboobaya. Qodobka 38-aad faqraddiisa 23-aad, Wasaaradda Horumarinta Maalgashiga, waxay leedahay inay diyaariso tallaabooyin lagu qaado cid kasta oo ku gafta tayada.

Iyaduna waxay leedahay kantarool gaar ah oo ay leedahay "anagaa wax kantaroolayna"; hay'adda dhawrista tayaduna waxay leedahay in ayaduna halkaas gaar u leedahay. Halkaasina waa wasaaraddii saddexaad ee ay isa soo galayaan.

Wasaaradda afraad ee ay isa soo galayaan waxa weeyaan Qodobka 39-aad faqraddiisa 7-aad oo odhanaysa xilka iyo waajibaadka Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka inay hirgaliso xarumo iyo nidaam lagu hubiyo tayada dawooyinka dalka soo galaya iyo isticmaalkooda; hay'adda tayaduna waxay xaq u leedahay Qodobkeeda 7-aad iyo 11-aad, Xeer Lr. 68/2024, intaa oo leh.

Haddaba waxa inoo baahan nimankeena leh xeerka aynu dejinno, waa diyaar baan u nahay in la dedejiyo laakiin waa in imika halkan laga shaqeeyo laguna kala xadeeyo; yaan la odhanin "cid baa jajuubaysa" iyo "cid baa haysa". Waanu haynaa xeerka, waa run muddo

badan buu inoo yaallay, laakiin waxa weeye hawsha inagaa iska leh, in hawsha laga guto hay'adahaas oo aad arkaysaan oo is haysta oo shaqadii lagu kala qaatay. Imika hay'adda tayadu maxay u samaysantahay, maxayse qaranka ugu fadhidaa haddii shaqadeedii hay'adaha kale iyo wasaaradaha kale ay qabanayaan? Maynu iskaba baabino markaa haddii ay sidaa tahay.

Markaa anigu waxaan qabaa xeerkan in dib loogu noqdo, ka dawladaha hoose ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha marka laga hadlayana la eego dastuurka; wax alaale wixii dastuurka ka soo horjeeda sharci maaha sida aynu inagu xukuno ama dastuurku dhigayo. Waan qabaa in maanta loo codeeyo oo aanay maanta inala dhaafin, laakiin waxaas oo dhami waxay u baahan yihiin in imika laga jawaabo, lagana doodo lana sameeyo oo la isla afgarto. Markaa waxaan rajaynayaa haddii Ilaahay yidhaahdo. Wasalaamu calaykum.

**Md. Cabdilaahi Yuusuf Axmed** *(01min, 10sec)***:-** Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim; guddoomiyaha Golaha Wakiillada, mudanayaasha Golaha Wakiillada, shaqaalaha weynaha Golaha Wakiillada iyo bahda saxaafadda dhammaantiin Asalaamu calaykum. Anigu shakhsiyan waxaan aaminsanahay oo mudanayaasha u soo jeedinayaa waa wada-shaqayntii xukuumadda hay'adaha xukuumadda dhexdooda, madaxweynahana kala xadayntooda iyo waajibaadka koobnaaday, uu yahay siday xukuumaddu u soo gudbisay ee golaha u keentay inaynu xeerkasi muddo badan golaha yaallay aynu ku sii dayno sidaa isaga lagu sii daayo.

Xeerkani waa xeer maamul, kol ay guurtida, dee wuu tagi doonaa, markaa anigu waxaan *seconded* garanaynayaa in sidii ay xukuumaddu ku soo gudbisay lagu sii daayo oo ku socdo, taas baan *seconded* garanayaa. Aad iyo aad baad u mahadsan tihiin.

**Md. Fu'aad Axmed Diiriye** *(02min, 40sec)***:-** Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim; aad iyo aad baad u mahadsan tahay guddoomiye. Kolay doodu waa koobnaatay, waa doodii Xeer-nidaamiyaha Xukuumadda, waa xeer khuseeya fulinta, kolay fulintuna waajibaadkeeda iyo shaqadeeda siday u gudanayso iyada ayay u taallaa. Waxaan aaminsanahay in Xeer-nidaamiyahani 90% dhamaystiran yahay.

Waxaan rabaa uun inaan dul istaago haddii Alle yidhaahdo: xeerku halka uu ka taabanayo dastuurka ayaa muhiim ah in aynu xanaftirno; laakiinse hay'adaha iyo shaqooyinkooda iyo siday waajibaadkooda u gudanayaan waa arrin u taalla fulinta, ayaan isleeyahay. Ilaalinta dastuurkana qofka koowaad ee u dhaartay waa madaxweynaha, cida labaad ee soo raacdana waxay weeyaan golayaasha baarlamaanka. Markaa waxaan soo jeedinayaa wixii dastuurka khuseeya waa inaynu dastuurka waafajino, sababtoo ah xeerkan wixii ka

qaldan dee sixid baa lagu samayn karaa oo waa la kaabi karaa oo wax ka beddel baa lagu samayn karaa, laakiin dastuurka inaynu baal marno uun baa ceeb ah haddii Ilaahay yidhaahdo.

Markaa iyada oo dastuurka Qodobka 111-aad iyo Xeer-nidaamiyaha innaga marka laba loo kala jabiyo, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Xeer-nidaamiyahaasi wuxuu xusayaa in xidhiidhiyaha xukuumadda iyo degmooyinku uu yahay wasaaradda cusub ee Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Magaalooyinka; dastuurkeenuna wuxuu xusayaa xidhiidhiyaha xukuumadda iyo dawladaha hoose iyo degmooyinku uu yahay Wasiirka Arrimaha Gudaha.

Markaa wax kasta oo dastuurka ka hor imanayaana wuxuu leeyahay dastuurkeenu inaynu taa is waafajino ayaa roon haddii Ilaahay yidhaahdo. Waxaan qabaa markaasi sida ugu dakhsaha badan, ulana waafaqsanahay Maxamed Xasan inaynu isla maanta dhamayno wixii xanaftir ah ee dastuurka ka hor imanaya, intaynu isla eegno aynu qodob iyo laba ka saarno haddii Ilaahay yidhaahdo. Markaa aad baan anigu u soo dhawaynayaa oo u taabacsanahay inaynu sida ugu dakhsaha badan maanta loo kiciyo haddii Ilaahay yidhaahdo, dastuurkana waa inaynu ilaalino oo aynu dhowrno. Wasalaamu calaykum.

**Md. Siciid Maxamed Ismaaciil** *(01min, 40sec):*- Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim; Alxamdulillaah wasalaatu calaa Rasuulillaah, wa asxaabihii, wasallu calayhi wasallam. Guddoomiye, mudanayaal, subax wanaagsan, Ilaahayna ha inooga dhigo subax barakaysan insha Allaah. Mawduucan aynu ka hadlayno in badan buu ina dhex yaallay, waana mid ka mid ah waxyaabaha looga baahan yahay si wax u kala socdaan. Markaa waxay aniga ila tahay afartii qodob ee Maxamed yidhi waa *seconded*, ra'yigii xildhibaan Fu'aad yidhina waa waajib in lagu eego oo diiradda lagu saaro ra'yigaa iyo qawaaniinteeda dastuuriga ah iyo sida ay yihiin, intaa kadibna inaynu ansixino sida ugu dakhsaha badan. Sallallaahu calayhi wasallam.

**Md. Saleebaan Maxamed Faarax** ***(01mnt, 08sec):***- Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Alxamdulilaahi Rabbil Caalamiin. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal awalan, ASC; ma badinayo hadalka, laakiin waxaan qabaa sidii rag hore ay ka dhawaajiyeen. Maaddaama xeerkan ay soo gudbisay xukuumadu, kadibna Golaha Wakiilada u gudbiyay guddidii ku shaqada lahayd ee guddida shuruucda, filayaa in Jamaal uu guddoomiyeha ka yahay. Anigu waxaan ku soo koobayaa guddidaasi sidii ay ku soo jeedisay in lagu ansixiyo, markay dib u fulin ku sameeyaan, intaa ku ekaado.

Xeerkana maanta, sidii odayaal kale iyo mudanayaal kale ay sheegeen, in maanta aynu isdhaafino codayntana u galno. Laakiin anigu waxaan qabaa in fikirkii guddidu ku soo gudbisay in dhinacna aan looga gudbin, iyagaa soo daraaseeyay waxa ay u arkeen, markay niqaash iyo wada hadal ka sii sameeyeen in sidaa lagu ansixiyo; markaa dood dheer inaan la galin sidaa lagu ansixiyo ayaan aaminsanahay. Wasalaamu calaykum.

**Md. Maxamed Xuseen Jaamac** *(03mnt, 14sec):-* Bismillaahi, Raxmaani, Raxiim, mudane Guddoomiye iyo mudanayaal waa mahadsan tihiin, kow waxaan soo jeedinayaa oo aan taageerayaa aragtidaa Xildhibaan Maxamed Xasan gaar ahaan wasaaradda xidhiidhka golayaasha iyo dastuurka in lagu daro wasaaradda xidhiidhka golayaasha, dastuurka iyo dimuqraadiyada sababo badan dartood qodobkaa Maxamed Xasan waa ku taageerayaa waanan aaminsanahay.

Marka labaad waxaan ku taageerayaa arrintaa Sanduuqa dhalinyarada ee Maxamed Xasan soo jeediyay, waxaanan Guddoomiye iyo mudanayaal aan ku taageerayaa labadaa qodob Maxamed Xasan. Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal xeerkan ina horyaala dhowr qodob baan ka taabanayaa oo is barbaran.

Guddoomiye iyo mudanayaal waxaan aaminsanahay in xeerkani si aan xadidnayn Madaxweynaha dalka awood ugu siinayo inuu kala qaybin karo, yareyn karo ama kordhin karo wasaaradaha, shaqooyinkoodna u kala wareejin karo, hay’ad ka dhigi karo wasaarad, wasaaradna u badali karo hay’ad.

Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal waxaan arkayaa markaa in Meesha laga saarayayo kaalintii Golaha Wakiilada ee xeer dejinta, waxaanu Madaxweynaha yeelanayaa awood Barlamaan iyo awood xukuumadeed oo isla siman.

Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal qodobka ka hadlaya labada wasaaradood ee laba loo kala qaybiyay waxaan aaminsanahay in arrin dastuuri ah ay tahay oo laba looma kala qaybin karo. Wasaaradda arrimaha Guduhu waa wasaarad ay toos ugu qorantahay Dastuurka mudane Guddoomiye iyo mudanayaal Jamhuuriyada Somaliland gaar ahaan qodobka 109aad faqradiisa 1aad xarafkiisa [a] iyo qodobka 113aad. Qodobkaasi waa mid kamid ah shan wasaaradood oo si khaas ah loo magacaabay oo kala ah: wasaaradda arrimaha gudaha, wasaaradda cadaalada iyo wasaaradda gaashandhiga waa qodob dastuuri ah. Wasaaradda daakhiligu mudane Guddoomiye iyo mudanayaal waxa loo asteeyay masuuliyad aan cid kale qaban karin sida Amniga degmooyinka, socodka dadka, aqoonsiga dadka iyo isku xidhka maamul daadejinta.

Mudane Guddoomiye iyo mudanayaal kala qaadisteeda iyo wax ka badal kasta oo lagu sameeyo magaceeda ama waajibaadkeedu waxaan u arkaa inay tahay dastuur jabin, waxa kaliyee lagu badali karaa ama lagu kala qaybin karaa iyadoo la raacayo habraaca wax ka badalka dastuurka, maaha xeer madaxweyne ama xeer caadiya in lagu kala badalo oo lagu taabto sidaa darteed kala qaadista wasaaradda arrimaha gudaha iyo abuurista laba wasaaradood mid amni iyo dawladaha hoose waa sharci darro ilaa laga badalo oo dastuurka la furo ayuun baa labadaa wasaaradood wax laga badali karaa oo la furi karaa. Mudanayaal maaha Golaha Wakiiladu inuu noqdo meherad la keeno xeer la ansixinayo ama si dadban loogu ogolaanayo Madaxweynaha awoodo dheeraad ah.

Waxaan halkan ku soo jeedinayaa in Qodobka 108aad mudane Guddoomiye iyo mudanayaal dib loogu celiyo guddii sharciyeed si loo xadeeyo awooda Madaxweynaha ee ku saabsan wax ka badalka hay'adaha dowladda, laba in la cadeeyo wasaaradaha dastuuriga ah ee uu xusay aan lagu badali karin xeer caadiya in Golaha Wakiiladu qaato doorkiisa.

waxaan soo jeedinayaa in Qodobkan 18aad haddii sidiisa lagu ansixiyo wuxuu furayaa in qaranku yeesho albaab lagasameyn karo wasaaradaha subax kasta lagu tirtiri karo galab kasta iyadoo aan Golaha Wakiilada waxba laga weydiin, markaa waxaan soo jeedinayaa qodobkaas in dib u eegis sharciyeed lagu sameeyo iyo wasaaradda arrimaha gudaha inaan laba loo kala qaybin karin ilaa dastuurka la furo waayo wasaaradda arrimaha gudaha waxay ku jirtaa afar wasaaradood oo dastuurku cadeeyay oo kala ah wasaaradda arrimaha gudaha, wasaaradda cadaalada, wasaaradda gaashandhiga iyo wasaaradda maaliyada. Wa salaamu calaykum.

**Md. Mustafe Axmed Cabdilaahi** *(05mnt, 30sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim, Guddoomiyeha, Mudanayaasha Golaha Wakiilada, Saxaafadda iyo Shaqaalaha weynaha Golaha, aad baan idiin salaamayaa, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaatuh. Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaal, haddii dood kooban kaga qayb qaato arrinkan Xeer Number 71, waxaa xaqiiqo ah in xeerkani Golaha ku raagay marka xaqiiqda laga hadlo, wallow duruufo badani ay Golaha ka jireen, fasaxyo lagu jiray, hawlo shaqo intaa la hayay.

Mudane Guddoomiye, Golaha sida uu Dastuurku dhigayo, waxa aynu soo saarno xeerar noqda kuwo dhaqan gal ah waxaana lagu dhaqmaa bulshadii inna soo dooratay, waxay iskugu jiraan xeerar maamul iyo farsamo, waxa aynu u baahanahay in xeerarka halkan ka samayno, ee bulshadii loogu adeegayo, in aynaan halkan ku burburin.

Qodobkaa waa in aynu maankeena ku haynaa, xeer kasta oo halkan ka soo baxa waa in aanu dhaawacayn xeer dhaqan gal ahaa oo jiray oo shaqaynayay.

Mudane Cabdikariin Meecaad Isaaq waxaan ku taageerayaa dooda ah in xeerkan uu yahay xeerka kala xadaynta hay'adaha xukuumadda, iyadoo la ixtiraamayo in Madaxweyne uu xaq u leeyahay hay'adihiisa xukuumadda uu kala badalo, hadba duruufta iyo waajibaadka uu dastuurku siiyay isaga oo adeegsanaya. Waxa aan u baahan nahay check and balance (eegid iyo isku dheelitirnaan) in Golaha uu saxo wixii ka soo baxa, sida labada gole ee ah Keenan marka uu ka baxo inuu u maro Golaha Guurtida.

Mudane Guddoomiye waxaan soo jeedinayaa hay'adda quality control (tayo kormeerka) wixii loo aas aasay inay ahaayeen in adeega iyo badeecada dalka soo galaysa tayadeeda iyo standardka caalamiga ah ay u eegto, wayna jiraan standard-yada, markaa hay'adihii ay kontoroolaysay, in shaqadeedii uu xeerku u waajibiyay inay qaataan hay'ado kale, arrinkaa waxaan u arkaa in aynu dib u eegno oo hay'adaha qaranka korniinkooda masuuliyad baa inaga saaran. In xeerarka halkan ka soo baxa in fiiro iyo faatin loo kala qaado, oo hay'ad awoodda ay lahayd in 10 hay'adood lagu qaybiyo, taas laftirkeedu waxay inooga baahan tahay dib u eegis.

Mudanayaal, waxaan soo jeedinayaa kol hadii doodi furanto oo mudanayaashu xaq u leeyihiin, in mudane kasta oo 82 ka xildhibaan ee Golaha Wakiilada ka mid ah, marka laga tago shirgudoonka oo ah hoggaanka Golaha, dooda xaq bay u leeyihiin. Markaa innagu ha u qaydin dooda dad gaar ah oo ha odhan inoo soo gabagabeynno, waxaan jeclahay hadii manta ka gaadhi karno waa ahlan wasahlan, hadii kale manta iyo berri wey socon kartaa inta mudanayaashu aragtidooda iyo kontrabiyuushankooda xeerkan ku darayaan ay uruurinayaan.

Mudane Guddoomiye waxaan taageerayaa dooda ah wasaaradda la yidhaa Xidhiidhka Golayaasha, in horumarinta dimuqraadiyada lagu daro, aad iyo aad baan u soo dhaweynayaa, mudanayaashii badan ee doodaas soo jeediyay waan ku taageersanahay. Arrimaha la xiriira xukuumadda ama Madaxweynaha haddii uu hay'adiisa wasaarado isku badalayo iyo haddii uu kala qaadayo masuuliyadahaasi madaxwaynaha ayay u taallaa. Innagu wixii shuruuc ah waynu la eegaynaa laakiin in aynu fududayno, waajib baa inaga saaran in aan khilaaf dhexdooda ah aan shaqo ku baaqan. Aad iyo aad baan arrinkaa u soo dhaweynayaa.

Waxaan soo jeedin lahaa xeerka in haddii alle ka dhigo aynu dedejino, waxaan kale oo aan soo jeedinayaa in aynu ka saxno wixii farsamo ee aynu aragno, sida xildhibaan Cabdikariin uu soo jeediyay awoodihii iyo waajibaadkii shaqo oo hay'ado badan lagu kala daray marka laga tago.

Waxaan soo jeedinayaa soo jeedintii iyo parabaawsarkii xukuumadda ee madaxwaynuhu keenay, inaan qaadano oo ku raacno ayaan soo jeedinayaa.Mudane Guddoomiye haddii aan aragti kooban ku daro, waxaan jeclaan lahaa maanta oo aan Golaha joogno, bulshadii ina soo doortay ilaa shalay dareen bay ku jirtay, dareenkaas oo ku saabsan arrimaha isgaadhsiinta, ka laftarkeeda in aynu qaraar kasoo saarno ayaan soo jeedinayaa.

Arrimaha isgaadhsiintu noloshii bulshada aad iyo aad bay u taabanayaan, waxyaabaha loo sameeyay free competition (tartanka xor ah) ee suuqa xorta ah uu dastuurkeenu u sheegay, waxa weeye inuu tartan yimaado, mabda'iisuna waa laba ujeedo, in tayada lagu tartamo iyo in qiimaha lagu tartamo. Mudane Guddoomiye Siciid Mire Faarax, maanta doodeenu waxay ku kooban tahay sida ku cad ajandahayaga, xeerka kala xadaynta xukuumadda, arrinkaas waa arrin muhiim ah, mar kale ayaynu u balanqaadaynaa. Mudane Guddoomiye waan ogahay dooda ha gelin mayso, waa dood inoo taagan maadama aynu ognahay waxa bulshada ka dhex dhacaya, kaana ha yareyn.

**Md. Cabdirashiid Cabdilaahi Muuse** *(04min, 36sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim, ugu horayn Mudane Guddoomiye, Mudanayaal, Shaqaalaha weynaha Golaha, iyo Saxaafadda dhammaan, waan idin salaamayaa, Asalaamu calaykum waraxmatullaahi wabarakaato. Salaam ka bacdi, runtii saaka waxaan ka doodaynaa wax ka badalka Xeer 71 ee kala xadaynta nidaamka xukuumadda, waa xeer aad iyo aad muhiim u ah, waa xeer muhiim u leh xukuumadda iyo waajibaadka maandhaytka mudanayaasha ama wasiirro ha noqoto ama hay'ad madaxbanaan ha noqoto, waa maandhaytka tilmaamaya awoodda hay'ad kastaa leedahay.

Runtii waan la qabaa mudanayaasha inuu aad iyo aad u habsaamay, duruufo uun Golaha taalay ayuu ku jiray oo shaqo uun ayuu ku jiray. Maalinkii aynu ansixinaynay ajandaha xeerka, 1aad ayuu inoo ahaa, xeerarka dhammaantood in aynu u ilaalino timetable-ka ay soo diyaariyeen shirgudoonka, aad iyo aad buu muhiim u yahay. Sidoo kale Mudane Guddoomiye, waxaan soo jeedin lahaa, qarankan waxa innagu waajib ah in aynu

ushaqayno 8 saacadood oo ka bilaabmaysa 7 ilaa 2 duhurnimo. Sidoo kale waxaan soo jeedin lahaa in 11 duhurnimo ama 12 duhurnimo aanu Golaha fasax galin ee uu ilaa 2 duhurnimo shaqeeyo. Waxaan kale oo aan soo jeedin lahaa in waqtiga shaqada aanu soo galayo inuusan ka dambeeyn 8 subaxnimo, sida uu xeer hoosaadku qorayo. Si xeerar u soo saaro Golaha, oo aan dhowr iyo sodon xeer aan ka yarayn baa Golaha horyaala.

Aniga oo ka duulaya waajibaadka faraha badan ee Golaha horyaal iyo muhiimada ay xukuumaddu u qabto xeerkanba, waxaan qabaa sida ugu dhakhsaha badan ugu degdega badan in maanta ama berri ama soddon beri xeerkaasi ansaxo oo innagu dhaafo. Waxaa muuqata dooda mudanayaasha qudhoodu in ay saaka aad u kooban tahay, waxaaba muuqata doodu inay maanta dhamaan doonto sida ii muuqata. Haddii ay maanta innaga dhamaato oo ugu danbayn aan berri innagu dhaafin, ayaan soo jeedinayaa.
Waxaan kale oo aan soo jeedinayaa oo aan runtii ayidayaa xeerkani sida mudanayaashii iga horeeyay sheegeen inuu yahay waafaqsanaan ama uu ka hor yimaado xeer hore oo jiray, in aynu saxno waa waajibaadka shaqada Golaha ayay ka mid tahay. Waxaan ayidsanahay Xeerka 68 ee tayada iyo dhawrista, oo ah xeer aad iyo aad muhiim u ah oo aad ogtihiin duruufaha badan ee ka dhasha haddii daawo ama maciishad kale ha noqoto.
Waxaan aad iyo aad u ayidsanahay in awooda hay'adda quality control awoodeedii ee ay hore u lahayd oo uu u qeexayo xeer 68 in aynu ka saarno qodobada ka hor imanaya, isla markaa aynu u dayno awoodihii uu xeerka gaarka ahi siiyay ee ay hay'adaasi leedahay. Waxaan kale oo ayidayaa oo taageerayaa madxafka qaranka oo runtii aad iyo aad muhiim u ah, sida uu sheegay Maxamed Xasan Siciid waxaan ku taageersanahay. Waxaan kale oo ayidayaa Wasaaradda Dastuurka, iyadana waxaan ayidayaa in laga dhigo Wasaaradda Dastuurka iyo Wadaninimada.

**Md. Axmed Dayib Aadan (ku cadeeye)** *(05mnt, 20sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim, mudane Guddoomiye iyo mudanayaal marka hore aad iyo aad baan mudanayaashii hore doodooda dhiibtay aad baan ugu mahad celinayaa, ee ka hadlay xeerkan iyo muhiimada uu u leeyahay dhismaha, dawladnimda iyo shaqada xukuumada, sidaa la sheegay waxaan ugu horayn soo jeedinayaa, xeerkan ay xukuumadu keentay in la dedejiyo, wixii Dastuurka ka hor imanayana aynu saxno, oo waa masuuliyaad keen a iyo waajibaadkeena, waxaan annigu Doodayda ku soo koobayaa oo aan qabaa, in inta kale oo xeerka sidii xukuumaddu ku soo gudbisay, loo sii daayo marka laga tago Qodobka 30aad ee xeerka oo qodobada ku jiraa si cad uga hor imanayaan Dastuurka JSL, gaar ahaan Qodobkiisa 111aad, mudane guddoomiye iyo mudanayaal, xeerkan xukuumada ka yimi, Qodobkiisa 30aad faqradiisa

15aad hadaynu akhrino waxay tilmaamaysaa, in uu yahay, waxa ay tilmaamaysaa isku xidhka xukuumada dhexe, iyo maamulka Gobolada iyo degmooyinku, inuu yahay wasaarada cusub ee dawaladaha hoose iyo horumarinta magaalooyinka.

Qodobkaasi waxa uu si cad oo badheedha uga hor imanayaa, Qodob Dastuuri ah, oo ah Qodobka 111aad faqradiisa 5aad iyo 6aad oo tilmaamaysa in iskuxidhaha xukuumada dhexe ama xidhiidhiyaha xukuumada dhexe ee Gobolada iyo degmooyinku uu yahay Badhasaabka Gobolka, taasi waxay tilmaamaysaa faqradaasi maadama ay ka hor imanayso Qodob dastuuri ah waxba kama jiraan, sidoo kale Qodobka 128aad, oo tilmaamaya saraynta Dastuurka isla markaana xeer kasta oo ka hor yimaada in ay yihiin waxba kama jiraan.

Isla sidoo kale xeerkaas faqraadkiisa oo Iyana u baahan in la waafajiyo, Dastuurka faqrada tilmaamaysa wasaarada cusub ee dawladaha hoose ay masuul ka tahay dawaladaha hoose iyo xeer hoosaadkooda samayntiisa, taas oo Iyana Qodobkaa Dastuuriga ah, Qodobka 111aad faqradiisa 10aad ay tilmaamayso, wasaarada iska lihi in ay tahay wasaarada Arrimaha Gudaha, oo ay ka masuul tahay dhamaan dawladaha hoose ee degmooyinka Dalka, in ay yeelanayaan xeer hoosaad isku mid ah cida ka gacansiinaysaa ay tahay wasaarada arrimaha Gudaha, gacansiin taasi hanoqoto mid sharci, mid maaliyadeed, hanoqoto mid maamul.

Sidaa awgeeg mudane guddoomiye iyo mudanayaal aniga oo soo koobaya waxaan soo jeedin lahaa, in labadaa faqradood laga saaro, isla sidaa ku xusan Qodobkaa Dastuuriga ah, lasiiyo cidii lahayd, oo dawladaha hoose la hoos geeyo lagu celiyo wasaaradii arrimaha Gudaha, wasaarada arrimaha Guduhu waa maamul iyo Amni labadaba, waxaana hadhaw khilaaf badani ka iman doona sida mudanayaal iyo dad badani qabaan, hadii xeerkan iyo masuuliyadeena aynu dayacno, dalku khilaaf badan gali doono, in dalku sharci jabin gali doono. Sidaa awgeed waxaan soo jeedinayaa mudane guddoomiye iyo mudanayaal in dawaladaha hoose lagu celiyo wasaarada arrimaha, Guddaha sidoo kale wasaarada cusub loo badalo wasaarada horumarinta iyo magaalooyinka Nashqadooyinka.

**Md. Yuusuf Faarax Warsame** *(01min, 01sec):-* **-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim shirgudoonka Golaha wakiilada, saxaafada, shaqaalaha Golaha Asalaamu calaykum warax matulaah wabarakaato, manta waxay doodiisu ina horyaala xeer aad iyo aad qaranka ugu muhiim ah, xeerkaas oo ah xeerka kala xadaynta xukuumada, xeerkaasi in badan buu ina horyaalay, waxaan markaa annigu denaynayaa ama soo jeedinayaa, aniga oo ixtiraamaya in aan secomengareeyo Qodobadii ay ka hadleen, Maxamed Xasan, Cumar Faraax Jaamac, Golaha iyo inta badan ay ka wada hadleen ee ahaa 4taa Qodob in aynu sidooda u

qaadano xeerkaana manta aynu isdhaafino oo aynu ansixino maadaama uu Golaha in badan horayaalay taas ayaan soo dhawaynayaa oo aan taageersanahay.

**Md. Abobakar Siciid Cali** *(02min, 51sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim mudane Guddoomiye iyo mudanayaal iyo shaqaalahaba Asalaamu calaykum waraxmatulaah wabarakaato, marka xigta waxaan mudanayaasha sida ay uga doodeen iyada oo aan runtii aan qirayo in xeerkani in muddo ah uu Golaha dhex yaalay, ay muhiimna ay tahay in la fududiyo sidii loo sii dayn lahaa xeerkaasi laakiin cabashada aan ka qabaa waxay tahay, in xeerkan laba arrimood ay muhiim u tahay, waa ta koobaad ee sidii ay mudanayaashii hore isku soo raaceen, Qodobka 18aad ee xeerkani, waxaad moodaa in uu yaraynayo ama uu Meesha ka saarayo miisaankii awoodaha labada Golle, iyada oo uu runtii uu madaxwaynaha siinayo awood, aan xadidnayn marka loo eego dhisida, ama kala dirida wasaarado cusub iyo ha'ado cusub.

Qodobka 90aad ee Dastuurku uu dhigayo, isla markaana uu sheegayana, magacaabista iyo kala dirida in lagu fulinayo xeer, sidoo kale waxaa jirta iyana mabda'a kala qaybsanaanta, awoodaha, Qodobka 38aad ee Dastuurka kaas oo Gollayaasha wakiilada iyo Guurtida, siinaya in ay kaalin ku leeyihiin ama ay ku yeeshaan marka isbadal weyn la samaynayo, arrintaasi waxay ubaahan tahay in Qodobkaa markaa Meesha laga saaro hadii aan laga saarayn, waxaynu ubaahan nahay xeer nidaamiye muujinaya checks and balances ama awood aan xadidnayn in ay meel usaaranto.

Marka labaad waxaan soo jeedinayaa in xeerkani uu si toos ah, uu saamayn ugu yeelanayo 15 xeer oo hore u jiray, oo Dalka hore uga sii jiray oo ka mid yihiin Xeerka Gobolada iyo degmooyinka, Xeerka maamulka dhulka iyo magaalooyinka, Xeerka Biyaha, Xeerka Doorashooyinka sidaa darted si ayna udhicin marka aynu sii dayno in ay dhacaan jaahwareer ka dhex dhaca xeerarkii hore u jiray iyo xeerkan, waxaan jeclaan lahaa in layswaafajiyo xeerkan iyo xeerarkii hore sidaa darted waxaan manta ku talin lahaa, in aanu xeerkani manta inna dhaafin, oo lala soo akhriyo xeerarkaa hore u jiray, markaa barri ilaa saddanbe in xeerkan ay doodiisu socoto iyada lawaafajinayo xeerarka hore u jiray.

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed (Liimo**) *(04min, 4osec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim Guddoomiyeha Golaha iyo mudanayaasha Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaato, hadalka waan idiin soo koobi doonaa, waxaan taabanayaa Qodob ku saabsan dhowr wasaaradood aan isleeyahay dhexdoodana jaahwareer xagga awoodaha ayaa waligoodba jiray isla mar ahaantana maamula, Arrin aad u xasaasi ah Somaliland. Muranada uu dhulku keenaa waa meelaha ugu xasaasin ee khilaafka ugu badan Somaliland keena oo marar badan dad ku dhintaan, wasaarada Beeruhu waxa ay

maamushaa dhul beereedyada sidoo kale waxay awood leedahay in ay beer cusub sharci u samayso, hadda arrimaha kala xadaynta wasaarada beeraha Qodobkeeda 4aad waxaa u qoran in ay ka hawlgasho, kala xadaynta dhul beereedyada iyo dhul daaqsimeedka iyada oo la kaashanaysa hay'adaha kala duwan ee ay khusayso.

Sidoo kale wasaarada deegaanka iyo isbadalka cimilada Qodobkeeda 4aad waxa ay siinaysaa awood taal amid ah oo wasaarada waxay siinaysaa kala xadaynta dhul daaqsimeedkii, iyo seerayaasha, halkaas waxaa ku jira madmadaw, aad u fara badan wasaaradee leadka ama hogaaminta iska leh marka lakala xadaynayo, dhul daaqsimeed, ma wasaaradii beeraha ayaa iska leh mise wasaaradii deegaanka ayaa iska leh. Sidoo kale wasaarada hawlaha guud, xeerkani waxa uu siinayaa in wixii dhul ku saabsan oo dhan, xeerku waxa uu u qoran yahay curinta iyo siyaasada, xeerarka, siyaasada iyo qorshayaasha lagu maamulayo guud ahaan dhulka waxaa iska leh wasaarada hawlaha guud, dee iyaduna halkaas awood ayay ku leedahay, kala xadayntii dhulka oo xeerkii dhulkii oo dhan wasaaradaa ayuu hoos geeyay.

Waxa aan hadalka aan ku soo koob bayaa, in Qodob cusub lagu daro halkaa wasaarada Beeraha, Qodob odhanaya marka wasaarada Beeruhu ay bixinayso Beer cusub ama ay bixinayso, sharci cusub ama ay sharci u samaynayso Beer cusub, waa in heshaa ogolaanshaha wasaaradaha, hawlaha guud dhulka iyo guryaynta, wasaarada deegaanka iyo isbadalka cimilada, iyo wasaarada tamarta iyo macdanta bacdamaa wasaaradaasi iyada laftirkeedu ay bixiso blockyo, macdaneed oo shirkadaha macdantu, ay qaataan.

Waxaan mar labaad ku soo gunaanadayaa arrimaha dhulku waa meelaha inta badan overlap-ka ugu fara badan uu wasaaradaha uu dhex yimaado, wasaarad awood u leh hadii dhul iyo seere lakala xadaynayo, ma wasaaradii beeraha ayaa latagayaa, ma wasaaradii deegaanka ayaa latagayaa, ma wasaaradii, hawlaha guud ayaa latagayaa xeerkani sida uu u qoran yahay mid walba ama wasaarad walba inta uu awood siiyay, ayuu hadana leeyahay hay'adaha awooda u leh ee ay khusayso, ayaa lala kaashanayaa.

Dadka muwaadiniinta Somaliland khal-khal ayay ku keentay, wasaarada ay hadii ay hawlahaasi yimaadaan ay ula tagayaan, sidoo Kalana wasaaradaha dhexdooda khilaaf iyo muran ayay keentaa awooda cida iska leh, xeerkan aynu manta gacanta aynu ku hayno, ee Ragga qaar ay leeyihiin yaynaan ka doodin oo aynaan akhriyin oo sidaa aynu ku Ansixinana ma uukala cadayn ee madmadawgii uun buu sii labalaabey.

Waxaan kolkaa mar labaad hadalka ku soo gabagabaynayaa, hal Qodob aynu ku darno halkaa wasaarada Beeraha, Qodob odhanaya bacdamaa, wasaarada Beeruhu ay tahay, wasaarada kaliya ee dhul cusub sharci u samaysa, ay tahay waqti xaadirkan marka magaalada laga baxo, aynu Qodob ku darno odhanaya, marka wasaarada Beeruhu ay bixinayso beer cusub ama sharci u samaynayso beer cusub waa in ay heshaa ogolaanshaha wasaaradaha, hawlaha guud dhulka iyo guryaynta, iyo wasaarada deegaanka isbadalka iyo cimilada, iyo wasaarada tamarta iyo macdanta waa in aynu Qodobkaa ku darnaa si aynu wasaarada beeruhu kaligeed ayna go'aan ayna la ogayn wasaaradihii kale ee arrimaha dhulku khuseeyay ayna u qaadan karin.

**Md. Xasan Cumar Xasan (Xasan Ogaal)** ***(****04min, 15sec):-* **-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim Guddoomiyeha Golaha wakiilada, xildhibaanada, shaqaalaha Golaha wakiilada, iyo saxaafada waan salaamayaa, Asalaamu calaykum warax matulaahi wabarakaato, manta waxa ina horyaala wax ka bedelka iyo kaabista xeerka Nidaamka xukuumada iyo Hay'adaha madaxa banaan 71/2024, xeerkaa sida ay mudanayaashii hore sheegeen muddo ayuu ina horyaalay, inuu hore inoo dhaafo si hay'adihii isbadalkan uu saameeyay ee wax ka badalka xeerkani ay ushaqo galaan, oo ay waajibaadkii ay Qaranka u hayeen ay ugutaan oo aynu hore isu dhaafino, oo hadiiba manta laga gaadhsiinayo, waan ayidsanahay.

Markaad xeerka eegto waxaan eegayaa lifaaqa Qodobada, iska hor immaanaya, xeerkan iyo xeerka qaybta Tayada, xeer number 68 2014ka Qodobada ugu muhiimsan ee xagga Tayada marka la eego, xeerka Nidaamka xukuumada Qodobka 32aad faqradiisa 16aad waxay ka hor imanaysaan Qodobka 7aad faqaradiisa 6aad iyo 11aad ee Xeerka dhawrista Tayada, Qodobka 32aad faqradiisa 16aad waxa u uku jiraa wasaarada xanaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer miyiga.Qodobka 37aad faqradiisa 13aad ee wasaarada Ganacsiga iyo Dalxiiska isagana waxa uu ka hor imanayaa, Qodob ku jira dhawrista Tayada, oo ahQodobka 7aad iyo ka 11aad ee xeerka dhawrista Tayada.

Qodobka 38aad faqradiisa 23aad ee wasaarada Horumarinta maalgashiga iyo warshadaha asaguna waxa uu ka hor imanayaa, Qodobka 11aad faqradiisa 1,2,3,5,6 iyo Qodobka 39aad oo ku jira hay'ada Tayada, Qodobka 39aad faqradiisa 7aad ee wasaarada Horumarinta Caafimaadka, asaguna Qodob halkaa ku jiraa waxa uu ka hor imanayaa, Qodobka 7aad iyo 11aad ee xeerka hay'ada dhawrista Tayada mudane guddoomiye xukuumadu xaq ayay u leedahay, in ay xeerka soo samayso oo ay qaabka ay u wada shaqaynayso, hasayeeshee inana waxa aynu xaq u leenahay in aynu la eegno oo la

akhrino, xeerarka dhaqan galka ah ee wadanka ka jira wixii ka hor imanaayana in ayna inaga bixin ee aynu isku badalno, oo aynu isku eegno.

Markaa mudane guddoomiye, iyo mudanayaal marka loo eego, xeerkan wax ka badalka iyo kaabista ah ee Nidaamka xukuumada ah Qodobada halkaa ku jiraa, waa qodobo mar walba Tayada iyo cantorolka ka hadlaya, markaa waxaan soo jeedin lahaa sidii ay xildhibaanadii iga horeeyay ay ka hadleen, in Qodobadaa iska hor imaanaya in aynu waajibkeena ka gudano, midna waan raacsanayaa in aynu xeerkaa oo muddo inala yaalay, oo hay'adihii shaqada kula lahaa ee loo kala qaybiyay, in ay waajibaadka ay Qarankooda ay u hayaan ay gutaan, in aynu hore ugu dedejino waan soo jeedin lahaa.

**Md. Mubaarig Muuse Ismaaciil** *(03min, 56sec):-* **-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim mudane Guddoomiye iyo xildhibaanada Golaha aad baad u mahadsan tihiin Dooda xeerkan, runtii waxaan ku soo koobayaa hadalkayga, sida uu madaxweynaha uu xeerkan ku soo gudbiyay, madaxweynaha isaga oo isticmaalaya awoodihiisa xeereed waxa uu u qoondeeyay xukuumada laamo shaqo waxaana kala hagaya arrimahan soo socda, muhiimada shaqadu ay u leedahay xukuumada, iyo sidii loo tixgalin lahaa baahiyaha loo qabo ka hortaga habsama raaca iyo tilmaamaha shaqada hay'adaha xukuumadu ay kala leeyihiin.

Xaqiijinta in xilalka laysu soo raaciyo, hab maamuli kara waxaad moodaa in xeerkan aynu wax badan ka badalnay, Qodobo ay ka mid yihiin 27aad, Qodobka 31aad, Qodobka 39aad, Qodobka 34aad, Qodobka 47aad, Qodobka 51aad, Qodobka 32aad, Qodobka 36aad, Qodobka 40aad, runtii waxaad moodaa in Guddigu si aad iyo aad u xeel dheer, in ay Qodobo farabadan ay ku soo dartay awoodaha wasaaradaha qaarkood, wasaarad walba waxaa halkan ka muuqata, awoodihii iyo shaqadii, ay xukuumadu lahayd, ay ku soo dartay Qodobo kale sida wasaaradda Qorshaynta oo 4 Qodob oo cusub oo kale lagu soo daray.

Wasaaradda Biyaha oo kale 12 Qodob oo kale lagu soo daray, shaqadeedii, wasaarad walba waxaad moodaa, in Qodobo dheeraad ah oo aan runtii saan umalaynayo aanu Golluhu aanu ka Tashan, in Qodobo kale, oo wasaarad ama maamul kale leeyahay taas oo keeni karta, khilaaf in wasaaraduhu ay isku qabsadaan maamulkii.

Waxa aad looga hadlay mudane Guddoomiye hay'adda Tayada, iyo in wasaaradaha qaarkood, sida wasaaradda caafimaadka, wasaaradda xanaanada xoolaha, in ay isa soo

galaan, sidaad ogtihiin shaqada wasaaraduhu way isa soo dhex galayaan, wasaaradda caafimaadku waxa ay ka masuul tahay, caafimaadka Dadka, dalka jooga waxay mas'uul ka tahay dadku in ay helaan, adeeg caafimaad waxaa ka mid ah in ay Dawooyin tayo leh ay helaan xaq bey u leedahay wasaaradu in ay eegto Tayada dawooyinka, hase yeeshee quality control-ku waxay xaq u leeyihiin, wax alle wixii wadanka ee kasoo dega Dekedda Berbera nooc kasta ha ahaadaan ama Raashin, ama Dawooyin ha ahaadaan, ama qalab ha ahaadaan in ay xaq u leedahay in dawooyinkaa iyo qalabkaa ama Bini'aadam ama xoolaba ha noqdaane, ama qalab kale ha noqdee in ay marwalba eegto, in aanay khatar ku ahayn Dadka iyo xoolahaba, ama Dadweynaha Dalka.

Markaa anigu uma arko in hay'adda tayo dhawrku, in lagu gudbey shaqadeedii, waxaan soo jeedinayaa, in Xeerkan sidii ay xukuumadu, usoo gudbisay, Garyaqaanka guud usoo gudbiyay, oo in badan laga soo shaqeeyay inuu Golluhu sidii u uku yimi u uku ansixiyo inaga wax ka badal iyo kaabis ku samayn.

**Md. Saleebaan Diiriye** *(04min, 14sec):-* Bismillaahi Raxmaani Raxiim shirgudoonka, xildhibaanada, saxaafada dhamaantiin Asalaamu calaykuw waraxmatulaahi wabarakootu, mudane Guddoomiye iyo mudanayaal xeerkani waa xeer aad iyo aad muhiim u ah, marka laga hadlayo Nidaamka hawl socodsiinta hay'adaha xukuumada qaranka sida aan filayo muddo ayuu Golleheena yaalay, waana arrin aad iyo aad u adag, waxay ahayd in aynu mar hore iska sii dayno.

Markaynu ka hadlayno Nidaamka iswaafajinta iyo kala xadaynta xukuumada marka hore, waa mid uun, waxaan doonayaa in aan second gareeyo laba qodob labadaba, in Meesha laga saaro Qodobada ka hor imanaya Dastuurka, oo xeerka aynu samaynayno waxaa asal u ah Dastuurka, markaa xeer aynu samaynaa oo inaga inaga baxaa micno samayn mayo, hadii uu Dastuurka ka hor imanayo, markaa Qodobada dastuurka sida cad uu u qaxay aynu ka saarno, taana waan second gareynayaa.

Waxaan doonayaa in aan ku daro labada hay'adood ee dhawrista Tayada, qaranka oo xildhibaano badan ay ka hadleen, iyo madxafka qaranka in labadaaba aynu hoos gayno wasaaradda Ganacsiga, waxyaabaha layaabka ee ku jira ee aan cidina ka hadal, iminka sida hay'adda hayjiinta oo kale, waa hay'ad qarankan aad iyo aad muhiim ugu ah, waxay ahayd wax ka tirsan wasaaradda caafimaadka, waxaa la hoos geeyay dawladaha Hoose, waxaan qabaa in hay'adaa dib loo celiyo oo lagu celiyo, wasaaradda caafimaadka.

Waad ogtihiin halka xaaladeeni caafimaad marayso, bulashadeenii xanuunada iyo baahiyaha danyarteena ay la daaladhacayso aad ogtihiin, waxaan qabaa in wax badan in arrintaasi ay khalad ku tahay, waanad arkayseen iyaga oo ka hadlaya hawlwadeenada caafimaadka ee Qaranku, taana waxaan odhan lahaa aynu soo Celino oo, Dawladaha hoose inamo yar-yar oo aan caafimaad waxba ka garanayn, in ay ku wareegaan farmasiyadii iyo magaaladii ceeb ayay inagu tahay, oo mid dhacdey garanayn oo number uun eegaya, xitaa waa labadalaa number-ka oo wax qiimo leh ma aha, qofku hadaanu alle ka baqayn.

Markaa waxaan soo jeedin lahaa in cidii aqoonta u lahayd aynu gayno, xeerkan waxaa u hadhay waxa uu marayaa Golihii Guurtida, waxaan jecelahay inaga Golle ahaan in xeerkani inna dhaafo, waxaan jecelahay oo ku darayaa in aan hal masalo soo qaato, xildhibaan Mustafe, arrinta ah shirkadaha Ganacsi ee adeega internetka, ee afka isusaaray Bulshada oo ka soo horjeeda xeerarka, oo ka soo horjeeda suuqii xorta ahaa, mudane Guddoomiye adiga oo mahadsan waxaan jecelahay, in aan Qodobkayga aan ku taageero xildhibaan Mustafe, waxaan jecelahay in aan ladamqado dadka danyarta ah, ee manta isku wada duruufta ah ee Qarankan ku nool ee manta Abaaruhu halakeeyeen, ee dhinac colaada kaga jira waxaan qabaa in ayna sax ahayn, waxaan qabaa in arrintaa shirkadaha meel layska taago, nimankaa shirkadahana, go'aan cad lagu soo saaro.

**Md. Cabdixakiin Hugur Cabdi** *(01min, 07sec):*- Bismillaahi Raxmaani Raxiim Guddoomiyaha, xildhibaanada Golaha wakiilada, shaqaalaha Golaha wakiilada, saxaafada, iyo marti sharafta, Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaato, runtii guddoomiye markii hore waxaan islahaa aad usoo diyaar garowdid oo aad ka qayb qaadatid, dabadeed waa tan soo ururtay waxay noqotay in aan fikirkayga ka dhiibto xeerkan oo in badan ina horyaalay muddo 8 bilood ah, aan fiicnayn in uu intaa ina horyaalo, maadama oo waxa aynu u shaqaynaynaa ay yihiin xeerarka dalka maadama inta aynu waajibaad keena ka gudano, in ay hore inoo dhaafaan, marka xeer lasoo gudud biyo macnaheedu waa laga maarmi waayay weeye, waa wax loo baahan yahay mar hadii ay baahidiisii ay taagan tahay in aynu is dhaafino sida ugu dhakhsaha badan, inaga oo waajibaad keena ka gudanayna.

Runtii waxaan soo jeedinayaa oo aan taageerayaa 4 tii Qodob ee uu soo jeediyay xildhibaan Maxamed Xasan Siciid ee ahaa, in sanduuqa dhalinyarada la madax baneeyo, iyo macjarka la hoos geeyo wasaaradda, guud ahaan waan second gareynayaa Maxamed Xasan Siciid.

**Md. Aadan Cismaan Xarbi** *(04min, 59sec):-* **-** Bismillaahi Raxmaani Raxiim koley anigu laftaydu waxaan jeclaa in aan dooda usoo diyaar garoobo laakin waxaan arkaa in Dooda la yara boobsiinaayo, markaa waxaan gartay in aan dhowr Qodob aan yidhaahdo, Qodobada aan doonaya in aan ka hadlo waa Qodobada marka koobaad Dastuurka ka hor imanaya, oo ku kooban oo kaliya wasaaradda laka saaray, in Qodobada Dastuurka ka hor imanaya la waafajiyo oo kaliya, wixii kale ee hawl ah ee ay dawladdu ku qabsanayso cidi ku qabsan mayso laakin Dastuurka ayaynu ubaahan nahay in aynu waafajino. Qodobka 111aad ee Dastuurka faqradiisa 6aad ee magacaabista Guddoomiyaha Gobolka iyo shaqadiisa, wasaaraddii arrimaha Gudaha iyo Amniga iyo wasaaraddii dawladaha Hoose oo labadiiba badhasaabkii ay shaqadiisii ay galayso, oo u baahan in lakala xadeeyo oo wasaaradihii shaqadooda loo kala xadeeyo.

Badhasaabka Gobolku waxa uu xukumaa waa dawladaha Hoose, ee D da ee ka hooseeya wax allaale wixii Gobolku uu xukumo oo dhan, ku waasina waxay raacsan yihiin marka halkan la eego wasaaraddii dawladaha Hoose, waxayna ahayd in wasaaradda arrimaha Gudaha raacaan oo ayna dawladaha hoose hoos iman, waayo marka la eego Gobol, iyo degmo, ayay kuwii waawaynaa yeelanayaan, kuwii yar yaraa waa degmo qudha, degmadii ayaa la doonayaa, in ay Gobolkii hoos tagto mar hadii ay Gobolkii hoos tago waxa ay hoos tagaysaa wasaaraddii arrimaha Gudaha, dhaqaale ahaan in ay labadii wasaaradood ay isku qabsadan arrinkaasi culays aad buu keenayaa, wixii aan degmo doorasho leh waxay leeyihiin Golle deegaan se wixii aan degmo doorasho lahayni, halkay hoos imanayaan in lakala cadeeyo wasaarada arrimaha Gudaha iyo wasaarada dawladaha Hoose.

Sharcigu waxa uu siinayaa in badhasaabku uu maamulo, badhasaabkuna wasaaradda arrimaha Gudaha ayuu hoostagaa, saa loo kala cadeeyo si ay kabkoodii ay u helaan, uu kabkuna uu hoos yimaado badhasaabka asna uu u saxeexo, kabkii ay yeelanayeen degmooyinka “D da ah Qodobkaasi waxa uu noqonayaa in aynu halkaa ku waafajino oo aynu cadayno, kabka dawladaha Hoose ee aan ahayn, kuwa degmo Doorashada leh xagee ayuu hoos imanayaa, ma wasaaradaha Arrimaha Gudaha mise waa ta Dawladaha Hoose, taa in lakala cadeeyo.

Qodob 6aad ee Dastuurka ah ayaa sheegaya oo xaqiijinaya inuu hoos imanayo Badhasaabka Gobolka, faqrada 10aad ee Golayaasha deegaanka, xeer hoosaadkii Golayaasha deegaanka ee iminka uu Cabdikariin sheegaayay, Dastuurka JSL ayaa sheegaya in ay yeelanayaan xeer isku mid ah, ma jiro xeer kale oo aan ahayn oo Dastuurka

oo kala saarayaa, wixii Dastuurku sheegayo in la raacaa ayay noqonaysaa, in loo baydho oo layidhaah xeerka ismaamulka degmooyinka qolo walba xeer hoosaad gaar ah ayuu siinayaa, laakiin waa in xeer hoosaadkoodii, uu badhasaabka iyo wasaaradda arrimaha Gudaha ay hoos tagaan, xeer hoosaadkaas waxa uu Dastuurku uu siiyay in ay hoos tagaan wasaaradda arrimaha Gudaha, markaa sidii looga soo jaro Dastuurkii in lafuraa ayay noqonaysaa, in layidhaah wasaarad ayaan ku wareejinay masoconayso.

Waxaan kale oo aan taageerayaa, arrimaha dhulka oo Maxamed Cismaan Liimo uu aad uga hadlay, Qodobkaa arrimaha dhulka ee ay iskaga hor imanayaan 4 wasaaradood, wasaaradda arrimaha Gudaha, wasaaradda Beeraha, wasaaradda, dhirta iyo daaqa iyo wasaaradda hawlaha guud iyo dhulka 4taa wasaaradood hawlihii dhulka way ku muransan yihiin, wayna iskaga hor imanayaan, marka layidhaah wasaaradda dawladaha hoose ayaan odhanayaa, iyagiina aan xad loo samayn ay Goboladii ay dhulkii ay xadaynayaan, arrinkaa dhulka waxaa loo baahan yahay si aan dhibaato badan, ee magaalooyinka ka taagan waxay u badan yihiin arrimaha dhulka, taana waxaynu ubaahan nahay in lakala xadeeyo, oo iminka inta aynu xeerkaa gacanta aynu ku hayno, arrimihii dhulka xalkiisii aynu u samayno dariiq, oo aynaan faraha ka qaadin.

Qodobadaa kale ee sanduuqa Maxamed Xasan Siciid sheegay waan ku raacsanahay sidaa uu sheegay in loo sameeyo maamul, madax banaan oo ay hoos tagaan, laba Qodob oo uu Maxamed sheegay oo ah ka tamarta iyo xeerka, xidhiidhka Gollayaasha oo aynu leenahay halaga daro magacaa Dimuqraadiyada si ay wasaaradii ay unoqoto wasaarad balaadhan, waxyaabo badan oo uu Dastuurka inaga Golle ahaan marka ay ina hor yimaadaan, cid aynu ula tagnaaba jirin, tan dimuqraadiyada oo kale marka layidhaah wasiir aynu yeedhno oo aynu nidhaahno wasiirkaa ayaa dimuqraadiyad lagala hadlayaa dee ma jiro, hadayna ahayn madaxtooyada.

**Md. Jaamac Abokor Dube** ***(01min, 06sec):-*** Bismillaahi Raxmaani Raxiim, shirgudoonka, xildhibaanada Golaha wakiilada, shaqaalaha, saxaafada, Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabarakaato, waxaan umalaynayaa in aan gabo-gabaynayoo, laba fikradood uun baa Meesha yaal, mid ay odhanayso xeerkani wuu inagu raagay oo 8 bilood baynu haynee, waana xeer loo baahan yahay inuu shaqeeyo, oo uu dhaqan galo, oo xukuumadiina ay ubaahan tahay, fikradna odhanayso qaladaad baa ku jira ee aynu saxno. Anigu waxaan raacsanahay in aynu xeerkan aynu sii dayno, maadama oo aynu in badan haynay oo wixii laga qabtay aynu ka qabanay, dee hadii aynu marwalba kaw kasoo bilowno waa, waxba ka biiri maayaan hadhawna qaladaad kale ayaa soo baxaya intan lasaxaybe ma xumee, waxaan raacsanahay in lasii daayo, waliba Guddoomiye waxaan ka

codsan lahaa, in cod lagaliyo mar hadii ay doodii ay dhamaatay, oo manta xeerkaasi inagu dhaafin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| **------------------------------------------------** | **-----------------------------------------** |